## WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD OGAATO SI AAD

## U ILAALISO NAFTAADA & DADKA KALE

# DAMBIYADA NACAYBKA



Waa maxay dambiga nacaybka?

Waa maxay sababta aad usoo sheegayso dambiyada nacaybka iyo dhacdooyinka eexashada

Sida loo helo taageerada aad u baahan tahay

### Dambiyada nacaybka ayaa saameeya in ka badan dhibbanaha




Dambiyada nacaybku waxay leeyihiin saameyn xun oo dhaafsan waxyeelada loo geystay hal dhibane. Waxay gaaraan dhammaan qoysaska, bulshada iyo dalka maadaama ay dadka kale ka baqayaan in iyagana loo hanjabo, la weeraro, iwm, iyagoo lagu beegsanayo cidda ay yihiin ama loo arko inay yihiin.

**Dhinacyada uu federaalku ilaaliyo:**

- Jinsiyada, Midabka, Waddanka Qofku ka Soo Jeedo
- Diinta
- Naafonimada, Doorashada Jinsiga
- Heerka Qoyska
- Jinsiga
- Aqoonsiga Jinsiga

## Dambi nacayb ama dhacdo eexasho?

Fal ama fal la isku dayo oo ku xadgudbayo sharciga dambiyada salkana ku haya eexasho ayaa loo soo oogi karaa dambi nacayb ah ahaan.

Heerka federaalka, waa dambi salka ku haya eexasho ka dhan ah jinsiyada, midabka, diinta, waddanka qofku ka soo jeedo, doorashada jinsiga, jinsiga, aqoonsiga jinsiga ama naafanimada. Sharciyada gobolka ayaa sidoo kale laga yaabaa inay oggolaadaan in gobolka ama deegaanka lagu xukumo dambiyada nacaybka qaarkood.

Habdhaqanada nacaybka ah, oo ay ku jiraan hadalada nacaybka ah, ma wada aha dambi. Falalka ku salaysan ra'yiyada khaldan ee aan dambiyada ahayn oo aan ku lug lahayn rabshado, hanjabaad ama burburka hanti ayaa loo tixgeliyaa inay yihiin eexasho ama dhacdooyin nacayb - waa foolxumo weyn laakiin ma aha dambi. Si kastaba ha ahaatee, in dhacdooyinkan noocan ah loo sheego booliiska deegaanka iyo wakiilada magaalada ayaa ka caawin karta inay wax baraan, wargeliyaan oo ay ilaaliyaan dhammaan bulshooyinkayaga. Ma aha in qof kasta oo ku kaca hadal nacayb ah uu gali doona dambi nacayb ah. Markay tani dhacdo, si kastaba ha ahaatee, diiwaangelinta dhacdooyinkan ayaa suurtogal ah in loo isticmaalo dacwad dambiyeed si loo muujiyo taxanka iyo dhiirigalinta dambiga.



# WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD OGAATO SI AAD

## U ILAALISO NAFTAADA & DADKA KALE

## Haddii aad tahay dhibbanaha dambi nacayb ah

### SOO SHEEG

- Isla markaaba la xiriir wakaalada fulinta sharciga ee deegaankaaga ka dibna u gudbi FBI-da.

### DIIWAANGELI

- Qor tafaasiisha ugu badan ee aad awooddo: da'da, midabka maqaarka, timaha wejiga, dhererka/miisaanka, dharka, nabarrada/tattoo-yada, faahfaahinta macluumaadka baabuurka, iwm. Kaliya sawir ama fidiyow ka qaad qofka ama baabuurka qofka haddii ay badqab tahay inaad sidaas sameeyso.
- Qor erayada saxda ah ee la yiri. Qor faahfaahinada inta ay maskaxdaada ka qoyan yihiin. Adeegso aalada duubista codka ama xusuus-qorka ee taleefankaaga.
- Keydi dhammaan caddaymaha (tusaale, iimaylada, sawirada shaashadda ee boostiyada, sawirada burburka, iwm.)
- Hel magacyada iyo macluumaadka xiriirka ee dhammaan dhibanayaasha iyo markhaatiyaasha.

### HEL TAAGEERO

- Kaligaa ma tihid - la xiriir asxaabta, kooxaha bulshada, kooxaha taageerada dhibbanaha.

## Kaligaa MA tihid

Dambi nacayb ah ama dhacdo eexasho ah ayaa laga yaabaa in loo geysto qof ama koox, laakiin dhammaanteen waxaan qaadan karnaa doorkeena si aan u xaqiijino in dhammaan deriskayaga iyo xubnaha bulshadayada ay dareemaan badqab/ammaan:

- Ka hadal nacaybka iyo dulqaad la'aanta
- Bulshadaada u samee isu-soo-baxyo taageero ah
- Gargaar iyo taageero u fidi dhibbanayaasha
- La shaqee sharci fulinta deegaankaaga, dawladda deegaankaaga, dugsiyada, ururada diimeed iyo kooxaha bulshada si looga jawaabo dambiyada nacaybka ah iyo dhacdooyinka eexashada marka ay dhacaan iyo si kor loogu qaado kahortagga iyo wacyigelinta




## SOO SHEEG DAMBIYADA NACAYBKA AH

### WAC BOOLIISKA

Dhacdooyinka usoo sheeg booliiska deegaankaaga ama xafiiska booliiska magaalada

HADDII AAD KHATAR KUJIRTO

**WAC 911**

### WAC FBI

Dhammaan dambiyada nacaybka ah u sheeg FBI-da adiga oo wacaya

**1-800-CALL-FBI**

### ONLAYN/BARTA INTERNETKA KU SOO SHEEG

Isticmaal barta internetka ee FBI-da si aad uga soo warbixiso dhacdada. Waxaad qarin kartaa aqoonsigaaga.

**TIPS.FBI.GOV**

Waxaa soo saaray Xafiiska Xeer-ilaaliyaha ee Mareykanka
Degmada Maine - 2023